



Lähialuekaveritoiminta Barnaamijka 'Saaxiibka Deegaanka' - Taageeridda isdhexgalka qoyska oo dhan

Helsinki ● Vantaa ● Kerava

Ma jeelaan lahayd inaad barato dad cusub, meelo cusub iyo adeegyada cusub ee gurigaaga, oo aad barato dhaqanka, deegaanka iyo dadka Finnishka ah?

Ma jeceshahay inaad wada barato luqadda finnishka iyo dhaqanka? Ma jeelaan lahayd inaad sidoo kale ka hesho agagaarkaaga saaxiibo cusub ama qoysas kale oo caruur haysta? Ama aad hesho taageerada dadka aad isku faca tiihiin ee marxaladda cusub ee noloshaada? Ma jeelaan lahayd inaad hesho waxqabadyo loogu talogalay qoyska oo dhan isla markaasna aad la samayso waayo-aragnimo wacan qoyska oo dhan? U hel qoyskaaga Saaxiib Deegaanka ah!



Asxaab cusub



Luuqadda iyo dhaqanka Finnishka



Taageerada isdhexgalka



Waxqabadyada qoyska oo dhan



Dhaqanka, farshaxanka iyo dabeecadda



Baro magaaladaada



Maxay waxqabadyadu na tusi karaan?

Barnaamijka 'Saaxiibka Deegaanka' waxa uu la xiriiraa waxqabadyo asxaabta ka dhexeeya oo la taageeray lana habeeyay oo loogu talogalay qoyska oo dhan si ay u taageeraan isdhexgalka! Saaxiibada oo wada-jira, waxaanu baranaynaa deegaanka gurigeena, adeegyadiisa, dhaqankiisa, ciyaaraha, iyo dabeecadiisa, laga bilaabo garoommada ciyaaraha ilaa matxafyada iyo maktabadda deegaanka ilaa munaasibadaha carruurta. Wuxaad ku biiri kartaa maalmaha qoyska ee luqadaha badan, waxaad la kulmi kartaa qoysas kale oo caruur ku haysta agagaarka, oo waxaad ka qaybqaadan kartaa dalxiisyada kooxda iyo munaasibadaha qoyska. Wuxaad si joogto ah ula kulmi doontaa Saaxiibkaaga Deegaanka ama qoyska Saaxiibkaaga Deegaanka ah, in ka badan 10 jeer lixdii bilood, muddadaas oo aad samayn karto saaxiibtinimo. Barnaamijka 'Saaxiibka Deegaanka' waxa uu ku siinayaan taageerada is-dhexgalka, waxyaalahi la samaynayo, saaxiibo cusub, iyo waxqabadyo ku habboon qoyskaaga gudaha magaaladaada. Isla mar ahaantaana, xirfadahaaga wacyigelinta Finnishka, dhaqanka, iyo wacyigelinta bulshada way sii xoogaysan doonaan adiga oo aan xitaa dareemin inta lagu jiro waxqabadyada xiisaha leh ee qoyska!



Sidee looga qaybqaataa barnaamijka 'Saaxiibka Deegaanka'?

Qoys kasta oo carruur leh oo u soo guuray Fiilaan una baahan in laga taageero la-qabashadooda deegaanka ayaa codsan kara barnaamijka. Uma baahnid inaad luqadda taqaanid ama aad kala taqaano degaankaaga. Wuxaad si toos ah u codsan kartaa barnaamijka adiga oo buuxinaya arjigan **www.yhteisetlapsemme.fi** ama iyada oo uu hagayo shaqaale adiga kuu gaar ah oo ka socda adeegyada degmada, adeegyada fayoobidda ee degmada, ama hawladeen kale. Haddii aad u baahan tahay in lagaa taageero buuxinta codsiga ama aad rabto maclumaa dheeraad ah, fadlan noogu soo dir iimaylka **lahialue@yhteisetlapsemme.fi**

**Nagu soo biir oo waxaannu kuu heli doonaa sSaaxiibkaaga Deegaanka ama Qoyska
Saaxiibkaaga Deegaanka ah ee kuugu dhow!**